# Waa la i soo xiray. Hadda kolkaa maxaa dhici?

I got arrested. What happens now?

## Bilaysku ma baari karaa aniga ama gaarigayga kolka la i qabto ka dib?

Haa. Ka dib kolka bilaysku ay ku qabtaan, inta badan waxa ay kaa baari hub ama waxyaabo kale oo mamnuuc ah sida maan-dooriyeyaal ka hor inta aysan ku gelin gaarigooda. Dastuurka Dowladda Dhexe iyo Dastuurka Minnesota ayaa yiraa waa aysan sameyn karaan arrintan.

Haddii uu bilaysku ku waydiisto inuu baaro gaarigaaga, waa inaad mar walba tiraa maya. Bilaysku marmarka qaarkood waxa ay baari karaan gaarigaaga ogolaanshahaaga la'aantii, sidda haddii lagu xiro joojinta gaariga ka dib. Laakiin, waa inaadan marnaba siin ogolaansho ah inay gaarigaaga baaraan.




## Ma i geynayaan xabsi?

Ka dib kolka askartu ay ku qabtaan ayna sameeyaan baaritaan, waxa ay ku geyn saldhiga bilayska ee deegaanka ama xabsiga degmadda. Saldhiga bilayska ama xabsiga degmadda marka lagu geeyo waa lagu diiwaan *gelin*. Taa macnaheedu waa waxa ay kaa qaadi faro iyo sawir waxayna kaa qaadi sidoo kale akhbaartaada shakhsiyanka ah.

## Bilaysku ma i waydiin karaan su'aalo ama i waraysan karaan aniga?

Kolka lagu soo xiro, waxaa dhici karta inay ku waydiiyaan su'aalo ku saabsan dambiga. Ka hor inta aysan isku dayin inay su'aalo ku waydiiyaan, waa khasab inay kula socod siiyaan xaquuqahaaga dastuuriga ah.

Qaar ka mid ah xaquuqahaasi waa:

- Xaqqa aamusnaanta. Taa macnaheedu waa khasab ma aha inaad la hadasho bilayska.
- Xaqqa ah inaad hesho qareen wakiil kaa noqda *kulana* joogta xilliga wax su'aalida.
- Xaqqa ah inaad hesho qareen maxkamaddu kuu magacowdo haddii aadan awoodin inaad adigu qareen jeebkaaga ah aad qabsato.

***Xataa haddii aysan askartu kuu sheegin inaad xaquuqahaa leedahay, wali xaquuqahaa waa aad leedahay***. Si aad u ilaaliso xaquuqahaaga, waa inaad u tiraaho si cad oo kor ah. Tusaale ahaan, "waxa aan rabaa inaan aamusnaado" ama "wax aan oranayaa ma jiraan" iyo "waxa aan rabaa inaan la hadlo qareen."

## Ma khasab baa inaan xabsiga ku sii jiraa?

Ka dib kolka lagu diiwaan geliyo, waxaa lagu sii deyn karaa (lagu fasaxi karaa) markiiba AMA waxaa dhici karta in lagu xiro (lagugu hayo adiga) xabsiga ilaa iyo inta aad ka arkayso xaakim. Arrintani waxa ay ku xiran tahay dambiga la yiri waad fashay iyo siddoo kale waxa qoladda xabsigu ama xafiiska shariifowgu uu qabo. Waxa ay go'aansan karaan inay ku sii daayaan ama ay ku hayaan. Waxa aad ka heli kartaa akhbaar kale oo ku saabsan sii deynta iyo sii haynta hoos.

## Maxaa dhici haddii la i sii daayo?

Haddii lagu sii daayo, bilaysku waxaa dhici karta inuu ku siiyo warqad markiiba ay ku qoran yihiin qodobada dacwada lagugu soo eedeeyey. Qof kasta oo la qabto lama siiyo warqada dacwada. Haddii aadan ka helin warqad qodobada dacwada ku saabsan bilayska, la soco warqadaha boostada kuugu yimaada si aad uga eegto qoraal maxkamadda ka yimaada oo la yiraa u Yeerid. Qaraalkan waxa ku qoran akhbaar ku saabsan kolka iyo meesha ay ka dhici balantaada ugu horeeysa ee maxkamadda. Balanta maxkamadda kuugu horeeysaa inta guud waxa ay dhacdaa 1-2 bilood ka dib waqtiga lagu qabtay, laakiin waxaa dhici karta inay qaadato muddo intaa ka badan haddii maxkamadahu ay buuxaan. Haddii aadan boostada ku helin warqada uga Yeerida maxkamada, wac maxkamadda si aad u eegto inuu jiro kiis adiga kaa dhan ah ama warqad soo qabasho oo adiga laguu gooyey.

## Maxaa dhici haddii xabsiga la i dhigo?

Haddii xabsiga lagu dhigo, sharciga ayaa oranaya waa khasab in xaakim la hor geeyo dacwadaada 36-saacadood gudahood. 36-saacadood kuma jiraan maalinta lagu soo qabtay, Axadaha, ama faystooyinka dowladda dhexe/gobolka.

Inta aad sugayso inaad xaakim aragto, waxaad u baahnaan kartaa inaad qareen qabsato. Eeg qaybta hoose ee "Siddee ku heli karaa qareen?"

## Ciddee ayaan kala hadlaa dacwadayda?



Waa inaad kala hadasho qareen dacwadaadda. **Ha kala** hadlin dacwadaadda qof kale oo xabsiga ku jira. **Ha uga** hadlin faahfaahin ku saabsan dacwadaadda telefanka inta aad xabsiga ku jirto. Labada xaaladoodba, waxa aad tiraahdo adiga ayaa dib laguugu isticmaali karaa xilliga maxkameynta. Haddii aad kula hadlayso qareenkaaga telefanka adigoo ka soo wacaya xabsiga, waydii inay quman tahay inaad ka wada hadashaan dacwadaadda.

## Siddee ku heli karaa qareen?

Isku day inaad ku hesho qareen adiga ku matala sida si ugu dhaqsaha badan. Isku day inaad arrintan sameyso ka hor balantaada maxkamada ee ugu horeeysa.

Haddii aadan awoodin inaad qabto qareen jeebkaaga ah, waxaa dhici karta inaad hesho qareen dadweyne oo bilaash ah.  Si aad u codso qareenka dadweynaha ee bilaashka ah, gal shabakada. https://mncourts.gov/Help-Topics/Public-Defender.aspx.

Siddoo kale waxaa dhici karta inaad ka hesho qareen bilaash ah ama mid kharashkiisu jaban yahay hay'adahan:



- The Legal Rights Center – waxa ay fidisaa adeegyo bilaash oo ah ka difaacida dambiyada dadka waaweyn iyo kurayda Degmadda Hennepin (Hennepin County). Wixii akhbaar kale ah, booqo shabakada (website) ama wac (612) 337-0030.

- Neighborhood Justice Center – waxa ay fidisaa adeegyo bilaash ah ama jaban oo la siiyo dadka ku qaabilaya dacwooyin dambi ku soo oogid ah Degmooyinka, Ramsey County, Dakota County, iyo Washington County. Wixii akhbaar kale ah, booqo shabakada (website) ama wac (651) 222-4703.

- Indian Legal Assistance Program - waxa ay fidisaa adeegyo bilaash ah ama jaban oo ah difaacida dadka dambiyada lagu soo eedeeyo ee Degmooyinka St. Louis County, Lake County, Cook County, Aitkin County, Carlton County, iyo Maxkamadda Qabaa'ilka ee Bois Forte (Bois Forte Tribal Court). Wixii akhbaar kale ah, booqo shabakada (website) ama wac (218) 727-2881.

- Regional Native Public Defense Corporation - waxa ay fidisaa adeegyo bilaash ah ama jaban oo ah ka difaacid dambiyada lagu soo eedeeyo xubnaha ka tirsan qabaa'ilka ka diiwaan-gashan dowladda dhexe ee Degmooyinka Cass County, Becker County, Clearwater County, Beltrami County, Mahnomen County, iyo Itasca County. Wixii akhbaar kale ah, booqo shabakada (website) ama wac (218) 339-5680 (Leech Lake) ama (218) 983-3285 (White Earth).

Haddii aad doonayso inaad qabsato qareen jeebkaaga ah, ka baaro mid Isbahaysiga Qareemada ee Minnesota (Minnesota State Bar Association) ee leh barta https://www.mnbar.org/member-directory/find-a-lawyer.

Haddii aadan heli karin qareen ka hor balantaadda maxkamada ee ugu horeeysa, waxa aad codsan kartaa qareen ama waxaad dalban kartaa qareemada dadweynaha xilliga dacwadaa.

## Maxaa dhaca xilliga balanta ugu horeeysa ee maxkamadda?

**Haddii lagu sii daayey**, qaadida dacwadaada ugu horeeysaa caadiyan waxa ay dhacdaa 1-2 bilood ka dib waqtiga lagu qabtay, laakiin waxaa dhici karta inay qaadato muddo intaa ka badan haddii maxkamadahu ay buuxaan. Balantan waxaa la yiraa imaanshaha koowaad ama dacwo oodid. Xilliga dhagaysiga dacwadda, adiga ama qareenkaagu waxa aad la kulmaysaan xeer-ilaaliyaha si aad uga wada hadashaan dacwadaadda. Inta badan, xeer-ilaaliyahu kolkaa waxa uu ku baaqaa heshiis waan-waaneed si loo xaliyo dacwadda. Adiga iyo qareenkaaga ayaa go'aansada inaad qaadataan heshiiska waan-waanta ah ama in aad sugtaan. Haddii aad go'aansato inaad qaadato heshiiska waan-waanta ah, waxa aad geli heshiis dambi qirshasho ah xilliga dhagaysiga dacwadaa ee hore. Haddii aad doorato inaad sugto, maxkamaddu waxa ay

qaban balan dhagaysi dacwo oo kale oo 1-6 bilood gudahood ah. Sugitaanku waxa uu ku siin karaa waqti badan oo aad ku eegto daliilaha aadna ugu kuur gasho dacwadda.

**Haddii xabsiga lagu dhigo**, dhagaysiga maxkamadda ugu horeeysa waa in xaakim go'aansado damaanadda sii deynta iyo shuruudaha kale ee sii deynta. Shuruudahu waxa ay noqon karaan sidda mukhaadaraad baarid, birta lugta lagu xiro, ama xanibaadyo ku saabsan haysashada wax hub ah. Qareenkaaga iyo xeer-ilaaliyahu waxa ay sameyn mudacyo ku saabsan damaanadda sii deynta iyo shuruudaha kale. Badanaa qareenkaagu waxa uu ku mudacaa in lacagta damaanada ee sii deyntu ay yaraato ama curaar la'aan in lagu sii daayo iyo in shuruudo kooban lagugu sii daayo. Xeer-ilaaliyahu waxaa dhici karta inuu ku raaco qareenkaaga mudaciisa ama waxaa dhici karta inuu ku mudaco inaad dhigto damaanad badan ama inaad u hogaansanto shuruudo ad-adag. Dhagaysiga dooda caynkan ahi badanaa waxa ay qaadataa qadar 5 daqiiqo ah ama ka yar.

**OGOW:** Dhagaysiga dacwadan *ma* aha ujeedadeedu in lagu go'aansato in lagu sii daayo iyo in kale. Sidda uu dhigayo Dastuurka Minnesota, cid walba waxa ay xaq u leedahay in la sii daayo ka hor maxkamadeynta weyn, haddii ay ogolaadaan inay bixiyaan lacagta damaanaada ah iyo/ama ay ogolaadaan inay u hogaansamaan wixii shuruudo ah ee kale. Xaakimku MA amri KARO inaad xabisga ku sii jirto la'aanta goyn lacag damaanad ah.

## Xaakimku ma i sii deyn karaa?

Xaakimka ayaa gaara go'aanka dambaysta ah ee ku saabsan lacagta damaanada ah ee la dhigayo iyo shuruudaha kale ee sii deynta. Xaakimku inta badan waxa uu haystaa 3 waxyaabood oo uu kala doorto:

1. **Waa lagu sii deyn karaa shuruudo la'aan.** Taa macnaheedu waa ma aha inaad bixiso wax lacag oo damaanad ah, bir lugta lagaaga xiro ama aad ogolaato wax kale oo shuruud ah. Waa khasab inaad maxkamaddda u balan qaado inaad imaan doonto balamahaaga maxkamadda ee mustaqbalka.

2. **Waxaa lagugu sii deyn karaa shuruudo.** Mid ka mid ah shuruudahaasi waxaa dhici karta inay noqoto dhigida lacag damaanad ah ka hor inta aan lagu sii deyn. Shuruudaha kale waxa ay noqon karaan waxyaabaha sidda, amarka la xiriirid  la'aanta cid, baarid mukhaadaraad, bir lug uga xir, ama aaladdo kale oo koronto ku shaqeeya oo kormeerid ah, iska-xaadirin xafiiska borobeeshinka iyo waxyaabo kale.



3. **Waa lagu sii deyn karaa iyadoo dhigida damaanaddu ay tahay shuruuda kaliya.** Hadii ay arrintani dhacdo, waxa aad dhigi cadadka damaanada ah oo buuxda, mana aha inaad ogolaato wax kale oo shuruudo ah.

## Sidee ayuu xaakimku u go'aansadaa inta ay noqonayso lacagta damaanadaydu?

Cadadka damaanadda iyo shuruudaha kale ee xaakimku uu doorto waxa ay ku xiran yihiin waxyaabaha sidda:

- Xaqaa'iqda dacwadaada
- Dambiga lagugu soo eedeeyey
- Sidda ay u xoogan yihiin daliilaha adiga kaa dhanka ee lagugu hayo
- Qoyskaaga iyo ku xirnaanshahaaga bulshada
- Inaad shaqo hayso iyo in kale
- Xaaladaadda caafimaadka madaxa, oo ay ku jiraan isticmaalka waxyaabaha maandooriyeyaasha ah
- Taariikhiyan wixii dambiyo ah ee aad horey u gaysatay
- Inaad waligaa horey balan maxkamadeed u goysay iyo in kale
- Inaad khatar ku tahay qofka dhibanaha ah, cid kale ama umadda


2 ugu dambaysa ee kuwaasi waa:

- Inaad waligaa u goysay balan maxkamadeed iyo
- Inaad khatar ku tahay dhibanaha ama umadda

**Waana 2 da arrimood ee ugu weyn ee xaakimku uu eego kolka uu dooranayo shuruudaha sii deynta. Marmar badan, xaakimtu waxa ay isticmaalaan qiimeyn maxkamadeynta ka horeeysa si ay ugu caawiso go'aansiga arrintan. Waxaa lagu siin buundo ku salaysan taariikhdaada dambi geysiga, taariikhdaada imaanshaha maxkamadaha, shaqada, tacliinta, iyo arrimo kale. buundooyinku waxa ay go'aamiyaan inaad tahay qof khatartiisu ay hooseeyso, dhexdhexaad tahay ama ay koreeyso.**

## Siddee ku bixiyaa lacagta damaanadda?

Hadii uu xaakimku amro lacag damaanad ah inaad dhigto, taa waxa aad ku sameyn kartaa 3 jid:



1. Bixi cadadka damaanadda oo dhan kaligaa, ama adiga oo uu ku caawinayo saaxiib ama qof ehel ahi. Haddii aad arrintan sameyso, waxa aad u baahan tahay inaad damaanadda oo dhan hal mar wada bixiso, iyo inaad cadadka la iska rabo oo go'an oo cadaan ah aad haysato. Wac xabsiga deegaankaaga si aad u ogaato xeerarkooda. Kolka aad maxkamadda timaado, waa ay kuu soo noqon lacagtaadii damaanada ahayd.

2. Haddii aadan awoodin inaad dhigto lacagta damaanada ah, waxa aad codsan kartaa waxa la yiraa Dhaqaalaha Xoriyada ee Minnesota [Minnesota Freedom Fund (MFF)] si ay kuu caawiso. Qareenkaaga ama qof ehel ah ayaa kuu dalbi kara adiga. Waxaana lagu codsan karaa khadka (online) ka. Haddii ay hay'ada MFF ogolaato inay kaa dhigto lacagta damaanadda ah, waxa ay dhigaan cadadka oo dhan maxkamada. Adeegyada MFF ku waa bilaash mana aha inaad iyada lacagtooda dib u siiso. Wixii akhbaar ah ee kale ka eeg shabakadda: www.mnfreedomfund.org.

3. Waxaad kaloo isticmaali kartaa shirkad ganacsi ah oo qaabilsan lacagaha damaanadda iyo curaarta. Tan waxaa sameyn kara qof kale oo labaad – inta badan qof ehel ah ama saaxiib. Marka aad adeegsato shirkad damaanad ama curaareed, qofku waxa uu siiyaa khidmad shirkadda curaarta. Khidmaddu inta badan waa 10% kiiba cadadka lacagta damaanadda ah. **Lacagtani qofka uma soo noqoto.** Kolka ay bixiyaan khidmadda, sidoo kale waxa ay la galaan ayna saxiixaan qandaraas shirkadda. Qandaraasku waxa uu dhigi in qofku uu mas'uul ka yahay inuu hubiyo inaad maxkamadda ku soo noqoto ka dib kolka lagu sii daayo.

   Kolka khidmada la bixiyo, qandaraaskana la saxiixo, shirkadda curaartu waxa ay ka xaraysaa qoraal maxkamadda. Qoraalkani waxa uu balan qaadaa in shirkaddu ay bixin doonto cadadka lacagta damaanadda oo buuxda haddii aad maxkamadda iman waydo. Haddii aad maxkamadda u gooyso, shirkadda curaartu waa inay bixisaa cadadka damaanada oo buuxa, qofka saxiixday qandaraaskuna waa inuu dib u siiyaa cadadka lacagta curaarta oo buuxa Shirkada curaarta.



### Ka Taxadar!

Qandaraasyada shirkadaha curaartu inta badan waxaa ku jira shuruudo waaweyn, sidda u ogaanta iyaga ama wakiiladooda (ugaarsadayaasha dambiileyaasha baxsada) in ay baari karaan guriga saxiixaha, ayna ilaaleyn karaan gaariga iyo xaaladda shaqada ee saxiixaha, ayna heli karaan xog xafidan, sida qoraalada caafimaadka. Qofka saxiixa qandaraasku waxaa dhici karta inuu in badan ka helo wicitaano, dhambaalo (text) iyo emaylo shirkadda curaarta. Waa muhiim in la fahmo khatarta lagana taxadaro kolka la adeegasanyo shirkadaha curaarta iyo damaanadda.

Haddii aad u baahan tahay inaad u dhigto lacag damaanad ah xirid laanta ah socdaalka ah (immigration) awgeed nidaamyada quseeyaa waa ay ka duwan yihiin kuwa maxkamadaha. Eeg warqadayada xogta aruusan ee *Curaaraha Laanta Socdaalka.*

## Ka waran haddii aanan bixin karin lacagta damaanada ah?

Haddii aadan bixin karin lacagta damaanadda ah, waxay u badan tahay inaad xabsiga ku sii jirayso inta dacwadaada xal looga helayo, maxkamadeyn ama heshiis waan-waan ah midkood ha lagu xaliyee. Arritani waxaa dhici karta inay qaadato dhowr cisho ilaa iyo dhowr bilood, iyadoo hadba ku xiran nooca dacwada iyo sidda ay maxkamaddu mushquul ugu tahay kiisaskeeda kale.

Waxa aad ka codsan kartaa maxkamadda inay u dib u eegto ayna dib u tixgeliso ldamaanadda *markii aad rabto.* Haddii uu dhib kaa haysto inaad dhigto damaanadda ama haddii lacagta damaanada ah oo kugu badani awgeed ay kaa hor taagan tahay inaad xabsiga ka baxdo, kala hadal qareenkaaga in laguu qabto balan dacwo dhageysi ah oo damaanada dib loogu eegayo.

## Maxaa dhici ka dib balantayda maxkamadeed ee ugu horeeysa?


Haddii aadan ku aqbalin baaq heshiis waanwaan ah balanta maxkamadda ee ugu horeeysa, kolkaa waxa aad haysataa ugu yaraan 1 kale oo balan maxkamadeed ah. Balantan waxaa la yiraa qaadida dacwada horudhaca ah ama midda waxyaabaha badan ka hadlaysa (omnibus). Badanaana waxa ay dhacdaan 1-2 bilood ka dib balantaada maxkamada ee koowaad, laakiin intaa waa ka badnaan kartaa mudaddu iyadoo hadba ku xiran sidda maxkamaddu musquul ugu tahay kiisaskeeda kale.  Balanta labaad ee maxkamaddu waa fursad kale oo adiga iyo qareenkaagu aad kiiska ugala hadli kartaan xeer-ilaaliyaha, aadna tixgeli kartaan heshiis qirasho dambiga ah ama aad ku codsan kartaan waqti kale oo la idin siiyo. Haddii aad codsato waqti dheeri ah, waxaa dhici karta inaad hesho 2-3 balamaha maxkamadaha horudhaca ah iyo kuwa waxyaabaha badan laga hadlo (omnibus) inta aad sugayso maxkamadeyntaada.

Qaar kale oo ka mid ah qaadida dacwadaha oo laga yaabo inaad marto ka hor maxkamadaada weyni waxa ay noqon karaan qaadidyo dacwo ku saabsan:

- Haddii ay jirto sabab lagu rumayn karo in dambi la geystay
- Aqbalaada daliilaha
- Isticmaalida daliilaha la xiriira taariikhdaada dambi geysi ama taariikhda dambi geysiyada makhraatiyaasha kale ee laga yaabo in maxkamadda la hor keeno

Qaar ka mid ah qaadida dacwooyinkaa waxa ay keeni karaan in kiiskaaga la baa'biyo ama aad ka hesho baaq waan-waaneed oo kuwii hore ka roon xeer-ilaaliyaha.

Haddii aadan xalin kiiskaaga xilliga qaadida dacwooyinkaa horudhaca ah, maxkamad in lagu kala baxo ayey u badan tahay. Kiisaska intooda badan waxa aad xaq u leedahay in dacwadaada garsoore dadweyne uu galo. Laakiin waxa aad dooran kartaa waxa la yiraa maxkamada miiska, taa macnaheedu waa inuu dacwadaada uu qaado xaakim kali ahi intii ay qaadi lahaayeen dad garsoore dadweyne ah.



***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**